UK Health Security Agency

# Ku saabsan qaaxada (TB)

TB waa cudur faafa oo badanaa saameeya sambabada. Waxa uu keenaa bakteeriyo. Wuxuu noqon karaa mid halis ah, laakiin waxaa lagu daweyn karaa antibiyootiko.

## Sida aad ugu qaadi karto cudurka TB

Marka qof qaba calaamadaha TB uu qufaco ama hindhiso, wuxuu hawada ku sii daayaa dhibco yaryar oo bakteeriyo ah. Way adag tahay in la qaado TB. Waa inaad la yeelataa xiriir dhow oo joogto ah qofka cudurka qaba oo aad neefsataa hawada cudurka sidata. Waxaa jira 2 nooc oo TB ah, mid firfircoon iyo mid dhuuban.

## TB firfircoon

Tani waxay ka dhigan tahay in bakteeriyadu firfircoon yihiin jidhkaaga. Adiga:

- Leedahay calaamado
- Wuu gudbin karaa cudurka
- wad xanuunsan karta

## Calaamadaha TB firfircoon

La hadal dhaqtarka guud haddii aad leedahay:

- Qufac aan fiicnaanayn aan kasii baxeeyn
- Qufac leh xaako (xabxad) dhiig ku jiro.
- Qandho ama dhidid habeenkii.
- Dareen gaajo la’aan ama miisaan dhimis.
- Daallin aad u daran.

## TB dhuuban

Tani waxay ka dhigan tahay in bakteeriyadu aysan firfircoonayn jidhkaaga. Adiga:

- ma laha calaamado
- Ma gudbin karo cudurka

## TB waa la daaweyn karaa

Haddii aad qaaddo TB, waxaad helaysaa baaritaano iyo daaweyn bilaash ah oo UK ah.

## Baaritaannada TB

Waad iska baaran kartaa xitaa haddii aadan lahayn calaamado.

Dhaqtarku wuxuu isticmaali karaa hal ama isku-darka baaritaanno si uu u hubiyo haddii aad qabto TB. Waxay ka mid yihiin:

- Sawir raajo oo laabta ah
- Baaritaanka maqaarka
- Baaritaanka dhiigga
- Tusaale dhuuq (xabxad) ah

## Yaa qaadi kara TB

Qof kasta wuu qaadi karaa TB, laakiin waxaa laga yaabaa inaad u badan tahay inaad qaaddo haddii aad:

- Wakhti badan la qaadato qof qaba TB firfircoon
- Ku noolaaday waddan TB-gu ku badan yahay
- Nidaamka difaaca jirka oo daciif ah ayaa leh
- Ku noolaanshaha xaalado ciriiri ah ama caafimaad darro ah
- Si joogto ah u sigaara cab, khamri cab, ama daroogo isticmaala
- Haddii aad hore u qabtay TB oo aan si wanaagsan loo daweynin

## Tallaalka TB

Waxaa jira tallaal TB ah. Waxa loo yaqaan BCG. BCG si joogto ah looma siin jadwalka tallaalka ee NHS sababtoo ah waxaa kaliya lagu talinayaa dadka halista sare ku jira. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka, booqo bogga NHS nhs.uk/vaccinations/bcg-vaccine-for-tuberculosis-tb/.

## Wax badan ka ogow TB

Daawo muuqaallo macluumaad ah oo ku saabsan TB dhuuban oo ku jira 7 luqadood YouTube.Raadi @TheTruthAboutTB.

Booqo bogga NHS ama iska skan QR koodhka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan TB nhs.uk/conditions/tuberculosis-tb/.

**Hay'adda Ammaanka Caafimaadka UK**
**Diyaarinta, ka hortagga, iyo ka jawaabidda halista caafimaadka,**
**Badbaadinta nolosha iyo ilaalinta nolol-maalmeedka.**